# Ku Saabsan Barnaamijka Dheefaha Barayaasha Waxbarashada Hore ee Minnesota

Juun 30, 2026 and Luulyo 2, 2026





# Dejinta Webinar-ka

- Webinar-kan waa la duubayaa, waxaana lagu diyaarinayaa qoraal.
- Isticmaal qaybta S&A si aad u weydiiso su'aalo.
- Isticmaal astaanta slider-ka si aad u doorato xulashooyinka qoraallada iyo turjumaadda.






# Waxa Aan Ka Hadli Doonno

- Sababta ay Minnesota u bixinayso fursaddan cusub ee dheefaha
- Cidda u qalmi karta
- Dheefaha la heli karo
- Sida loo codsado
- Waxa dhaca ka dib marka aad codsato
- Halka aad caawimaad ka heli karto haddii aad qabto su'aalo



# Maxay Minnesota u Bixinaysaa Barnaamijkan?

- Barayaasha waxbarashada hore waxay door muhiim ah ka ciyaaraan taageeridda carruurta iyo qoysaska.
- Barayaal badan oo waxbarashada hore ah ma helaan dhammaan dheefaha ay u baahan yihiin.
- Helitaanka dheefaha waxay noqon karaan kuwo qaali ah ama adag, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya barnaamijyada yaryar.
- Minnesota waxay sahaminaysaa habab cusub oo lagu caawinayo barayaasha waxbarashada hore inay helaan dheefo taageera caafimaadkooda, fayoqabkooda, iyo xasilloonidooda dhaqaale.

58% ka mid ah bixiyeyaashii hore ee daryeelka carruurta qoysaska ayaa sheegay in la'aanta dheefaha ay door dhexdhexaad ah ama weyn ka qaadatay go'aankooda ay ku xireen ganacsigooda.

*Sahanka Bixiyeyaashii Hore ee Daryeelka Carruurta Qoysaska (2026), Xafiiska Heerka Dhaqaale ee Haweenka ee Minnesota iyo Xafiiska Ombuds-ka ee Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta Qoysaska*

# Waa Maxay Barnaamijkan?

Barnaamijka Dheefaha Barayaasha Waxbarashada Hore ee Minnesota wuxuu taageeri karaa qiyaastii **800 ilaa 1,000 barayaal ee waxbarashada hore ah oo u qalma, kuna kala sugan gobolka oo dhan.**

Iyadoo loo marayo barnaamijkan, Minnesota waxay:

- Siinaysaa barayaasha waxbarashada hore ee u qalma fursad ay ku helaan xulasho dheefo kala duwan
- Baranaysaa noocyada dheefaha sida ugu wanaagsan u daboolaya baahiyaha barayaasha waxbarashada hore
- Fahmaysaa waxa loo baahan yahay si dheefaha si toos ah loogu siiyo barayaasha waxbarashada hore
- Adeegsanaysaa wixii laga barto barnaamijkan si ay uga caawiso hagidda go'aannada mustaqbalka ee ku saabsan dheefaha iyo taageerada shaqaalaha

# Maxay Ka-Qaybgalayaashu Heli Karaan?

Haddii la doorto, ka-qaybgalayaashu waxay:

- Heli karaan ilaa $55 bishii oo loogu talagalay dheefaha u qalma
- Dooran karaan dheefaha sida ugu habboon baahiyahooda iyo baahiyaha qoysaskooda
- Iska diiwaangelin karaan dheefo aan ku xirnayn loo-shaqeeye gaar ah
- Ka dooran karaan liiska dheefaha
  - Caafimaadka iyo fayoqabka (tusaale ahaan, adeegyada caafimaadka ee daryeelka aragga iyo daryeelka ilkaha)
  - Ilaalinta dhaqaale (tusaale ahaan, caymiska naafonimada, caymiska shilalka)
  - Taageerooyinka dhacdooyinka nolosha (tusaale ahaan, adeegyada sharciga)
- Barnaamijkan dheefaha ma aha caymis caafimaad oo dhammaystiran. Waxaa loogu talagalay inuu kabo caymiska caafimaad ee aad hadda haysato iyo inuu taageero caafimaadka iyo fayoqabka.

MINNESOTA SRI

# Yaa U Qalma Inuu Codsado?





# Shuruudaha U-qalmitaanka ee shaqsiyeed

**Waxaad u qalmi kartaa inaad codsato haddii aad:**

- Tahay ugu yaraan 18 jir
- Ka shaqayso ama maamusho **barnaamij u qalma oo waxbarashada iyo daryeelka carruurta hore ee Minnesota ah oo buuxiya shuruudaha**
- Shaqayso celcelis ahaan 32 saacadood toddobaadkii
- Shaqayso ugu yaraan 8 bilood sannadkii

**Barnaamijyada U Qalma**

Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga haysta

Barnaamijyada daryeelka carruurta qoysaska ee shatiga haysta

Barnaamijyada ay shatiyn qabiilooyinka

Barnaamijyada Head Start ee shahaadaysan

# Dulmarka Dheefaha La Heli Karo





# Ku Saabsan Optima Benefits & Payroll (Dheefaha & Maamulka Mushaar-bixinta)

Optima waa ururka:

- Bixin doona xulashooyinka dheefaha ee laga heli karo barnaamijkan
- Bixin doona xulashooyinka dheefaha ee laga heli karo barnaamijkan
- Ka jawaabi doona su'aalaha ku saabsan dheefaha la heli karo
- Maamuli doona maamulka dheefaha inta barnaamijka socdo

# Dheefaha Caafimaadka iyo Fayoqabka ee La Heli Karo

Taageer baahiyadaada caafimaad ee xag jireed, maskaxeed, iyo daryeelka ka hortagga cudurrada.

| | | |
|---|---|---|
| **Daryeelka Caafimaadka ee Onleenka** | **Daawaynta Caafimaadka ee Fogaan-aragga** | Taageer baahiyahaaga caafimaad ee jireed, maskaxeed, iyo daryeelka ka hortagga cudurrada. |
| | **Daawaynta Maskaxda ee Fogaan-aragga** | La-talin iyo taageero caafimaadka maskaxda oo onleen ah |
| | **Daryeelka Aasaasiga ah ee Onleenka*** | Taageero joogto ah oo loogu talagalay daryeelka ka hortagga cudurrada iyo xaaladaha caafimaad ee daba-dheeraada. |
| | **Daryeelka Maqaarka*** | Qiimeyn iyo daaweyn onleen ah oo loogu talagalay xaaladaha caadiga ah ee maqaarka. |
| **Daryeelka Ka Hortagga Cudurrada** | **Daryeelka Aragga** | Qarashka baaritaanka indhaha, muraayadaha indhaha, iyo adeegyada daryeelka aragga. |
| | **Daryeelka Ilkaha** | Qarashka daryeelka ka hortagga cudurrada iyo adeegyada kale ee daryeelka ilkaha. |

**Waxaa lagu heli karaa ikhtiyaar dheeraad ah oo iskaa loo bixiyo*

*Sawirkan waxaa sameeyay ChatGPT, waxaana dib u eegay oo tafatiray kooxda mashruuca*

# Dheefaha Ilaalinta Dhaqaale ee La Heli Karo

Ka caawi ilaalinta xaaladdaada dhaqaale marka ay dhacaan dhacdooyin lama filaan ah.

| | |
|---|---|
| **Caymiska Nolosha** | Taageero dhaqaale oo loo fidiyo dadka aad ka tagto marka aad geeriyooto. |
| **Caymiska Naafonimada ee Muddada Gaaban iyo Muddada Dheer** | Beddelka dakhliga haddii aadan shaqayn karin sababo la xiriira jirro ama dhaawac muddo gaaban ama muddo dheer ah. |
| **Caymiska Shilalka** | Lacag caddaan ah oo lagu bixiyo dhaawacyada shilalka ee la daboolay iyo daryeelka la xiriira. |
| **Magdhowga Joogitaanka Isbitaalka** | Lacag caddaan ah oo lagu bixiyo joogitaanka isbitaalka ee la daboolay. |
| **Caymiska Cudurrada Haliska ah** | Waxa uu bixiyaa lacag caddaan ah haddii lagaa helo cudur halis ah oo la daboolay. |

*Sawirkan waxaa sameeyay ChatGPT, waxaana dib u eegis iyo tafatir ku sameeyay kooxda mashruuca*

# Taageerooyinka Dheeraadka ah ee La Heli Karo ee saameeya Dhacdooyinka Nolosha

Taageero loogu talagalay arrimaha muhiimka ah ee shakhsiyeed, qoyska, iyo mid xag dhaqaale ah

| | |
|---|---|
| **Adeegyada Sharciga** | Helitaan talo iyo taageero sharci oo ku saabsan dardaaranka iyo qorshaynta hantida, arrimaha qoyska, arrimaha guryaha iyo guri kireystayaasha, deymaha iyo arrimaha dhaqaalaha, iyo baahiyaha kale ee sharciga ah ee nolol maalmeedka. |

*Sawirkan waxaa sameeyay ChatGPT, waxaana dib u eegis iyo tafatir ku sameeyay kooxda mashruuca*

# Sida Loo Codsado





# Si Degdeg ah u Codso Maadaama Boosasku Xaddidan Yihiin

- Waqtiga codsigu wuxuu bilaabanayaa 6 Luulyo saacadda 8:00 subaxnimo, Saacaddaha Dhexe ( Central Time)
- Buuxinta codsigu waxay qaadanaysaa qiyaastii 5 ilaa 10 daqiiqo
- **U diyaar garow inaad bixiso:**
  - Macluumaadka xiriirka
  - Macluumaadka ku saabsan loo-shaqeeyahaaga ama barnaamijka u qalma
  - Jadwalkaaga shaqada
  - Ugu yaraan laba warqadood oo mushahar oo dhowaan ah (tani ma khusayso milkiilayaasha daryeelka carruurta qoysaska).
- La soco iimayllada ka imanaya Christen Park oo ka socota SRI ee la xiriira codsigaaga, oo hubiso in ay eimailka kaa galin galka spam-ka ama junk-ka ee iimaylka
- Haddii awoodda barnaamijka buuxsanto, waxaa lagugu dari doonaa liiska sugitaanka ee marka ay boosas ama maalgelin cusub ay soo baxaan

# Taariikhaha Muhiimka ah

### Muddada Codsiga

**ÅWuxuu furmayaa Luulyo 6 saacadda 8:00 subaxnimo, Waqtiga Bartamaha**

**ÅWuxuu xirmayaa Sebtembar 11 saacadda 5:00 galabnimo, Waqtiga Bartamaha**

### Iska Diiwaangelinta Dheefaha Ka Dib Ogeysiiska

Waxaad haysataa **2 toddobaad** ka dib marka aad ka hesho ogeysiiska u-qalmitaankaaga Christen Park oo ka socota SRI si aad isaga diiwaangeliso dheefaha

### Helitaanka Dheefaha

ÅDheefahaaga waxay bilaabanayaan maalinta koowaad ee bisha ka dambaysa marka aad ku doorato dheefaha bogga internetka ee Optima

ÅDheefahaaga waxay sii soconayaan ilaa **Sebtembar 2027**

# Maxaa Dhacaya Ka Dib Marka Aad Codsato?

1 → 2 → 3 → 4 → 5

**1. Codso**

Gudbi codsigaaga iyo dukumeentiyada loo baahan yahay..

**2. Dib u eegis**

SRI waxay dib u eegtaa codsigaaga waxayna xaqiijisaa u-qalmitaankaaga.

**3. Ogeysiin**

SRI waxay ku ogeysiinaysaa haddii aad:

- U qalanto
- Ku jirto liiska sugitaanka
- Aadan u qalmin

**4. Sahanka & Iska Diiwaangelinta**

Buuxi sahanka loo baahan yahay oo iska diiwaangeli dheefaha.

**5. Dheefaha Way Bilaabanayaan**

Bilow helitaanka dheefaha.

MINNESOTA SRI

# Maxaa Dhacaya Ka Dib Marka Aad Hesho Ogeysiiskaaga?

| U Qalma | Ku Jira Liiska Sugitaanka | Aan U Qalmin |
|---|---|---|
| Muddo 2 toddobaad gudahood ku buuxi sahanka loo baahan yahay oo iska diiwaangeli dheefaha<br><br>Hel dheefaha maalinta koowaad ee bisha. | Waa lagula soo xiriiri doonaa haddii boos bannaan soo baxo. | Dib u eeg ogeysiiska laguu soo diray oo la xiriir SRI haddii aad qabto wax su'aalo ah. |

# Sidee Ayaad Ku Ogaan Kartaa Barnaamijka Dheefaha?

Macluumaadka ku saabsan barnaamijka dheefaha waxaa wadaagi kara DCYF, la-hawlgalayaasha, iyo hababka isgaarsiinta ee kala duwan ee Minnesota.

| Kanaalka Isgaarsiinta | Tusaalooyin |
|---|---|
| La-hawlgalayaasha gobolka iyo kuwa gobollada | Develop registry, Minnesota licensing list, R&R, MDAL, First Children's Finance, Child Care Aware, MN CC Associates, Help Me Connect, MnAEYC, Wayfinder, E2E, MIFs, Parent Aware, CCA of MN training sponsor organizations |
| Xarumaha daryeelka carruurta | Head Start Association, Minnesota Head Start Collaboration Office, Brightwheel or other CCMs |
| Xarumaha Head Start ee Shahaadaysan | Head Start Association, Minnesota Head Start Collaboration Office |
| Bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoysaska | Shared Service Alliance, FCC Association |
| Barnaamijyada ay shatiyaan qabiilooyinka | Minnesota Tribal Resources for Early Childhood Care (MNTRECC), Head Start Association, Minnesota Head Start Collaboration Office |

# Xaggee Ayaad Caawimaad Ka Heli Kartaa?

**Hooostan ayaad kala xiriiri kartaa arrimaha soo socda:**

- haddii aad qabto su'aalo ku saabsan
  - Barnaamijka dheefaha
  - U-qalmitaanka barnaamijka, codsiga, iyo sahannada
  - Dheefaha iyo iska diiwaangelinta

**Iimayl:** **EarlyEducatorBenefits.DCYF@state.mn.us**

## la Soco Wararkii Ugu Dambeeyay

- Bogga Internetka ee DCYF : https://dcyf.mn.gov/programs-directory/early-educator-benefits-program
  - Ogeysiisyada codsiga
  - Duubisyada webinar-rada
  - Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQs)
  - Cusboonaysiinta barnaamijka
- Bogga Internetka ee Optima: https://optimabenefitsgroup.com/minnesota-ece-workforce
  - Cusboonaysiinta barnaamijka
  - Fiidiyowyada macluumaadka ee ku saabsan dheefaha

# Su'aalo iyo Jawaabo

# MAHADSANIDIIN!

EarlyEducatorBenefits.DCYF@state.mn.us

SRI

MINNESOTA

Shaqadan waxaa suurageliyay maalgelin federaal ah (93.434 – ESSA Preschool Development Grants Birth through Five) iyo deeqda Innovating Financial Systems to Build Capacity for ECE Compensation Grant, oo ay maalgelisay Early Educator Investment Collaborative. Waxa ku jira dukumeentigan waa mas'uuliyadda keliya ee qorayaasha, mana aha inay matalaan aragtida rasmiga ah ee Office of Child Care, Administration for Children and Families, ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka (U.S. Department of Health and Human Services). Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo bogga deeqda Preschool Development Grant ee Minnesota: **https://education.mn.gov/MDE/dse/early/preschgr/**